



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad

Documentiga Kol.3aad.Kul.13-aad/2013

09/10/2013

Kalfadhiga 3-aad

kulankiisa 13-aad Sac. Fur.12:05gh., Sac .Xir.12:55gd.

Guntinta: 150

Ajendaha:

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
- 2. Ansixinta ajendaha**
- 3. Ansixinta Heshiiskii Favouri**
- 4. Warbixinta Guddiga Xeer-Hoosaadka**

**Shir-guddoomiyaha ,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane
Muxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari),**

**Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Baarlamanka Mudane Maxamed
Cusmaan Jawaari,waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka,
uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.**

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Baarlamanka Mudane Maxamed
Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'anka
kariimka, uuna Akhriyay XIL: Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha waxa uu xildhibaanada weydistey in ay ajendaha
ansixiyan, weyna ansixiyeen .Guddoomiyaha ayaa sheegey in maalinta
Axada loo yeeray Wasiirka Warfaafinta in uu Golaha horyimaado
kasoo ka hadlidoono heshiiskii ay kala saxiixden (favouri).

Intaa ka dib, Guddoomiyaha, ayaa u yeerey Guddoomiyaha Guddiga
xeer-hoosadka si uu warbixin Golaha ka siiyo shaqooyinkii ay soo
qabteyn. **XIL:Baq-daadi**, waxa uu Golaha ka hor sheegey, in ay
Guddiga xeer-hoosadka si wanaagsan ugu soo shaqeeyeen, wuxuu
kaleintaas ku dararey , in qodobada qaarkood ay waxa ka bedelen,
qodobo kalana ay wax ku dareyn, , waxa uu yiri guddiyada
baarlamanka qaarkood , waxay nagu kordhiyen fikrado, wuxuu kale uu

xildhibaanada ka codsadey in ay qodob-qodob u ansixiyaan, xil:baqdaadi, waxa uu ku soo dhaweyey **XIL:Dr.Cilmi**, waxa uu Golaha ka hor akhriyay, dhamaan talo soo jeedintii guddiga xeer-hoosadka ,isagoo qodob walba uu hal-hal u dul istaagey,akhriyeyna qodobadii ay wax ka badelen iyo kuwii ay ku dareyn. Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa u sheegay in ay soo akhristaan laba maalmood, maalinta sabtida waxaa looga doodaya qodob-qodob.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa sheegey in maalinta Axada loo yeeridoono, Wasiirka Warfaafinta, waxaa kale uu yiri guddoomiyaha in bari uu shir ka jiro (Uganda house).

Shir-Guddoonka Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheikh Cusman Jawaari, uu shir guddoominayay kal.3aad kul.13aad uu sheegey in uu shirka xiranyahay saacada markey aheyd, 12:55gd.